Duruusta Tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa

Qormadii 7aad

Qalinkii Cabdirisaaq Caqli. (e-mail: cabdicaqli@hotmail.com.)

Sixid: *Qormadii 6aad waxaa ku qornaa in Kabiir Cumar ahaa Sheikhii ku hagayey Sheikh Madar jidka tasawufka. Kabiir Khaliil ayaa ahaa Sheikhii ku hagayey Sheikh Madar jidka tasawufka, ee maaha kabiir Cumar.*

Ugu yaraan 26 sano ayuu Sheikh Madar (AHN), diinta ka baranayey magaalada Harar.Wuxuuna marxaladii hore ee waxbarashadiisa si qotodheer u bartay cilmiga shariicada, iyo afka carabiga, tiiyoo uu korodhsaday aqoonta maadooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin, fiqiga, sunnaha Nebiga (NNKHA), axaadiista, tafsiirka Quraanka, naxwaha carabiga, sarfiga, balaaqada, cilmal –Mandaqa iwm. Waxayna qoraalada ilaa hadda la hayo ee uu qoray inoo muujinayaan in maadooyinkaasi kala duwan uu aad u dhex muuquurtay barashadooda.

Marxaladii labaadna wuxuu si xooggan u gudogalay cilmiga tasawufka, oo ah cilmiga lagu xakamaynayo hawada nafta, laguna sifaynayo qalbiga si xasuusta Ilaahay u noqoto mid ka buuxda qalbigiisa had iyo jeer. Waxaana inoo muuqan kara, in sannado badan uu ku hawlanaa sidii qalbigiisu u caadaysan lahaa dikriga Ilaahay una laasimi lahaa. Waxaana u suurtogalay inuu ka wada gudbo caqabadihii marxaladha kala duwan ee tasawufka.

Waxaa intaasi u sii dheeraa isagoo caruurnimadiisii ilaa uu ka qaangaadhayey ku soo barbaaray dhaqanka bulshada soomaaliyeed, soona bartay aqoonta kala duwan ee lagama maarmaanka u ah bulshada Somaaliyeed, oo ay ka mid yihiin cilmiga xoolo dhaqista (Veterinary & animal husbandry). Cilmiga aqoonta dhirta (Botany), Cilmiga aqoonta dhulka, dabaylaha, iyo roobabka (Geography), Cilmiga aqoonta afka, maahmaahaha iyo gabayada (Language & Literature), Cilmiga aqoonta abtirsiga (geneology) cilmiga qabdhismeedka bulshada somalida (Anthropology), Cilmiga aqoonta dhaqanka bulshadiisa (Sociology), Cilmiga adkaysiga iyo socodka (Physical fitness), iyo cilmiga fardafuulka.

Barashada cilmiyadaasi iyo aqoomahaasi kala duwan ayaa siisay maskax bislaatay, kana dhigtay Sheikh Madar (AHN), shakhsiyad dhammaystiran, oo aqoon buuxda u leh bulshada soomaaliyeed iyo cilmiyada kala duwan ee diinta Islaamkaba. Wuxuuna noqday qof si qoto dheer u yaqaan shariicada Islaamka, islamarkaana Alle cabsigu aad ugu weynyahay, oo qalbigiisa ay had iyo jeer ka buuxaan xasuusta Ilaahay iyo dikrigiisu.

Muddo ka badan 26 sano ayuu ku noolaa magaalada Harar oo uu wax ku baranayey. Bii'adda magaalada Harar ee uu mudadaasi dheer ku noolaa. Waxay nolosha Harar ahayd mid aad uga duwan bii'addii reer guuraaga ahayd ee uu ku soo kacaamay. Waxay bii'adani ahayd mid maamul dawladeed oo boqortooyo ahi ka jiro, gaar ahaan magaalada iyo agagaarkeeda, lana deganyahay oo aan kolba meel loo guurayn. Deegaanka ku xeeran magaaladuna waxay u badnaayeen dad dhulka beerta iyagoo soo saaraya noocyo kala duwan oo cuntadooda iyo baahiyahooda kalaba la xidhiidha. Waxaa muuqata inuu Sheikh Madar (AHN) mudadii uu Harar joogay aad uga faaiidaystay barashada waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin labadaasi bii'aadood, isagoo isgarab dhigaya mid walba faaiidada iyo khasaaraha ay leedahay. Tiiyoo uu Sheikh Madar (AHN) mudadaasi uu Harar joogay aad u bartay cilmiga diinta waxaa suurtogal ah inay u muuqdeen faaiidooyinka iyo khasaaraha mid waliba u leedahay diinta Islaamka iyo dadweynaha muslimiinta ee ku dhex nool. Waxaynuna arki karnaa in Sheikh Madar uu soo dheegtay, soona qaatay arrimihii Harar kaga wanaagsanayd reer guuraanimnadii ka jirtay Somaliland oo markii uu Hargeisa yimid ku dhaqaaqay inuu ka hirgeliyo. Taasi oo aynu falanqayn doono markaynu soo gaadhno xilligeeda.

Sida maantaba jirta, marka ay soomaalidu wax ku baranayso meel ka fog dalka hooyo, ama ay ku nooshahayba, waxay isku hawliyaan helitaanka iyo raadinta wararka ku saabsan dalkii ay ka yimaadeen. Waxayna had iyo jeer isku mashquuliyaan sidii ay ula socon lahaayeen arrimahii ugu danbeeyay ee ka dhacaya halkii ay ka soo kicitimeen. Waxayna ku dedaalaan sidii ay u heli lahaayeen warkarka ku saabsan bulshadooda. Waxaana qurbojoogta u caado ah, inay xiiso dheeraad ah siiyaan qofka ka yimaadda dalkii hooyo, iyagoo si isdaba joog ah, oo qotodheer u waraysanaya, kuna celcelinaya su'aalo kala duwan oo ay dalkii ka weydiinayaan. Taasi waxay si dadban inoogu iftiiminaysaa in mudadii uu Sheikh Madar (AHN), wax ka baranayey Harar uu si tallaabo tallaabo ah ula socday arrimaha ka dhacaya halkii uu ka yimid. Sidaasi oo kale ardaydii ay wax ka wada baranayeen magaalada Harar, si faahfaahsan ayey ula socdeen wararka dalkooda. Waxaana suurtogal ah inay marar badan ardaydaasi diinta baranaysaa iyo Sheikha hogaaminayaaba, ka sheekaysteen, kana doodeen arrimaha ka dhacaya dalka Somaliland.

Haddii aynu hadaba dib u fiirinno waxyaabihii dalka Somaliland ka dhacayey xilliyadii uu Sheikh Madar (AHN) wax ka baranayey magaalada Harar, inakoo cuskanayna qoraaladii xilliyadaasi la qoray iyo taariikhda afka layskugu gudbiyaba, waxaa inoo muuqanaya in dagaalada ka dhex oogan qabiilooyinku aad u bateen una kordheen. Waxaa kale oo sii kordhay xoolihii la kala dhacayey lana kala qaadayey. Waxaa xilliyadaasi hoos u dhacay ganacsigii magaalada Harar la lahayd dekadda Berbera oo ay qaar ka mid ah dagaaladaasi ka holcayay dalku saameeyeen. Sidaynu hore u soo araganay dalka kama jirin maamul dawladeed, ee waxaa dalka ka talinayey qaab ku salaysan talo tolnimo iyo xeerar qabiil oo qofka iyo qabiilooyinka kala duwanba saameeya. Badanaana dagaaladu waxay ku ekaayeen heer aan dhaafsiisnayn inta magwadaagta leh. Taasoo ah in duulaanada iyo xoolaha la kala qaadayaa ku ekaayeen laba dhinac oo mid waliba mag wadaagi ka dhaxayso.

Sanadihii uu Sheikh Madar (AHN) diinta ka baranayey Harar may kordhin uun dagaalada reeraha dhex marayaa uun, ee waxaa kordhay heerarkii dagaaladu taagnaan jireen, ee ahayd inay ku koobnaadaan inta mag wadaagta leh. Dagaaladaasi cusubi waxay noqdeen qaar ay dheeraatay mudada ay soconayeen, badatayna khasaaraha iyo dibaatooyinka ay keenayeen. Waxaa dagaaladaasi sida joogtada ah u socday ee ay riiqdoodu dheeraatay ka mid ahaa dagaallo ka dhex ognaa reer Axmed Nuux iyo reer Yoonis Nuux, oo hoos u dhigay ganacsigii Harar la lahayd Berbera. Sidoo kale, dagaaladii ka dhex aloosnaa reer Cabdi Ciise iyo Huwan (Arap iyo reer Gabdoon), ayaa sanado badan soo jiitamay. Waxaa intaasi dheeraa duulaanada kedis ah ee isbahaysiga Golwaraabe aanay u kala aabo dayeen reeraha deriskooda ah oo idil.

Shaki kuma jiro in dagaaladaasi, ay werwer badan ku abuureen culimadii diinta ka baranaysay magaalada Harar. Waayo, sidaynu hore u soo aragnay waxay bulshada Somaliland u qabsanayd Wadaad iyo Waranle, taasoo ay wadaadadu badanaa meel dhexe iska taagi jireen dagaaladaasi dhex maraya bulshada ay culimada u yihiin. Waana mid inoo muuqan karta in marar badan culimadii wax ka baranaysay magaalada Harar ay aad u falanqeeyeen dagaaladaasi iyagoo lafoguraya sababaha abuuraya, iyo sidii loo soo afjari lahaaba. Waxaana muuqata in culimadu ay dagaaladaasi u arkayeen masiibo bulshadooda ku soo habsatay.

Kabiir Khaliil oo jidka tasawufka ku hagayey Sheikh Madar iyo culimada kale ee ay marxaladani wada baranayeen ayey ugu muuqatay in ay haboon tahay in la soo afjaro masiibadaasi. Waxaana suurtogal ah inuu marar badan weydiiyay culimadan uu wax barayo sida ugu haboon ee loo hawlgeli karo. Waxaa kale oo jirta in uu sanado badan ku hagayey culimadani jidka tasawufka. Waxay la noqotay inuu masiibadan ku habsatay Somaliland uga dhigo ardaydiisa imtixaankii ay ku qalin jabin lahaayeen, qofka imtixaankaasi ka gudbaana uu noqdo Sheikh buuxa oo u madax banaan fidinta dariiqada Qaadiriyada ee Somaliland.

Maalin uu xanuunsanayey Kabiir Khaliil,oo ay xummad aad u xoogani haysay, ayuu ardaydiisii isugu yeedhay. Waxay ardaydiina aragtay Sheikhii oo xumad kululi hayso oo sakaraadba ku dhow. Markii ay dhammaan ardaydii oo idili ku soo ururtay iyagoo ka murugaysan xummadda Sheikhoodi haysa, kuna ducaynaya in Ilaahay ka dul qaado xanunkani ayuu Kabiir Khaliil soo hordhigay ardaydiisii Su'aal sarbeeb ah oo maldahan, ahna imtixaankii ay ku qalinjibin lahaayeen. Waana mid jirta in tusaalooyinka iyo hadalada dadka tasawufka ku dhaqma ay ku badantahay hadalada sarbeebta ahi. Wuxuu Kabiir Khalil weydiyay ardaydiisii " Kuma ayaa iga dul qaadaya xumadani i haysa oo isagu la wareegaya xanuunkan i haya oo idil ." Sheikh Madar(AHN) oo ugu da' yar ardaydani uu kabiir Khaliil su'aasha weydiiyay ayaa gartay jawaabta su'aashani oo yidhi " Sheikh anigaa xumadani kaa qaadaya ee igu soo wareeji". Wuxuuna noqday ardayga keliya ee codsaday in xumadaasi lagu soo wareejiyo. Waana mid aynu ogsoonahay in qofku ugu jecelyahay naftiisa, kun adag tahay dadka badidooda inay aqbalaan in xanuun qof kale haya lagu soo wareejiyo. Markii uu Kabiir Khaliil arkay in Sheikh Madar oo keliyi gartay jawaabta su'aashiisa, noqdayna ardayga keliya ee oglaaday inuu la wareego

xumadani kulul ee haysa, ayuu ardaydiisii wargeliyay qofka ku guuleystay imtixaankii. Wuxuuna ardaydii ku wareegsanayd u sheegay in Wilaayadii uu ku wareejiyay Sheikh Madar. Sidaasi awgeedna uu yahay Sheikha madax u noqonaya, oo ay tahay inay dabagalaan, una hogaansamaan amaradiisa oo idil.

Waxay taariikhda afka layskugu gudbiyaa inoo sheegaysaa inay culimada qaar ka mid ahi aanay jeclaysanin, in Sheikh Madar oo ugu da' yar, uguna sanado yar mudadii ay tasawufka baranayeen uu Wilaayadii oo idil gacanta ku dhigo oo uu madax u noqdo culimo ka da' weyn oo uga soo horreysay barashada cilmiga tasawufka. Hase ahaatee muddo yar kadib markii Sheikh Madar laga arkay karaamooyin taageeraya hogaamintiisa ayay culimadii ay tasawufka wada baranayeeen oo idili wada daba galeen, una hogaansameen.

Waxaa suurtogal ah in hadalkani maldahan ee sarbeebta ahaa ee uu Kabiir Khalill ku tilmaamay xummad isaga haysa, uu micnaha runta ah ee uu ula jeeday tahay masiibada ka taagan Somaliland ee ay sababayaan dagaalada ka dhex aloosan bulshada Somaliland dhexdeeda, maalin walbana sii kordhaya. Taasoo inoo muujinaysa in Sheikh Madar loo xilsaaray in masiibooyinka dalka ka dhex taagan iyo dagaalada ka dhex holcaya uu qaboojiyo, waxna ka qabto. Hadii arrinku sidaasi yahay, waa maxay aragtida uu qabo iyo qorshaha uu Sheikh Madar (AHN) ku talo galay ee uu masiibadani ku joojin karaa? Qormada danbe ayeynu isku dayi in su'aalahaasi aynu ka jawaabno.